

KU SOCOTO WALIDIINTA

Diiwaangelinta barnaamijka carruurta lagu hayo iskuulka (SFO) 2021/2022

Diiwaangelinta waxay ku egtahay: 1.APRIL

Helidda SFO waxay ka dhacda iskuulka aad caadiyan ka tirsan tahay manta, sidoo kale waxay khuseysaa kuwa laga yaabo inaay iska beddeli doonaan iskuulka xilliga dayrta. Diiwaangelintaada ayaa laga sii wadi doonaa iskuulka cusub. SFO waxaa la siiya ardayda dhigata fasalka 1.-4aad. Degmada Elverum waxay kaloo siisa boosaska SFO carruurta leh baahiyaha gaarka ah oo dhigto fasalka 5-7aad. Diiwaangelintu waxay ka dhacaysaa nidaamka maamulka iskuulka oo lo yaqaano, Visma: [Visma Flyt skole](#). Oo lagu galo aqoonsiga diijitaalka ah. Halkaan waxaad ka heli doontaa [hage](#) gaaban oo ku saabsan dalbashada.

Markaad gasho ka dib, ka dooro iskuulkada qaybta-bidix. Xullo "SFO" iyo ardiga aad u dalbanaayso. Ka dibna dooro "boos cusub". Waalidiinta waxay helayaan xaqiijin iimayl ama farin qoraal ah oo ah in dalabka la helay iyo ogeysiin ah in dalabka la qabtay lagana shaqeeeyay. Khasab kuguma ahan inaad codsato sannad kasta. Qabka la iskaaga joojiyo iyo wax looga bedelo booska ayaa lagu sharxay cutubka 5aad ee qodobbada barnaamijka SFO. Si aad uu joojiso barnaamijka SFO, waa inaad gasho [Visma flyt skole](#), oo aad ku galayso aqoonsiga diijitaalka ah.

Kuwa hore u laha boos **SFO**, uma baahno inaad mar kale dalbato. Kuwii idinka mid ah ee booska rabin wa inaay iska fasaxan. Xeerarka barnaamijka waxay ku yaallan Visma iyo bogga degmada ee Elverum.

Diiwaangelinta, oo la dhiibo wixii ka dambeeya 1da Abriil, waxaa go'aan ka gaari doono maamulaha iskuulka, ilaa heer ay jirto boos ka banaan SFO iyo shaqaale ku filan carruurta ka qayb geli doonto.

Saacadaha furitaanka SFO 07.00-17.00 waxay furan tahay inta aysan carruurta lahayn fasal ama iskuul caadi ah.

Iskuulada qaar ayaa SFO lagaa furaa 06:45

Qiimaha booska buuxo waa. Kr 3250 , - Booska aan booqilkii booqol ahayn waa. Kr 2580,-

Booska aan buuxin waa ilaa 15 saacadood halkii usbuuc.

Inta lagu jiro fasaxyada, booska aan buuxin wuxuu u dhigmaa 35 saacadood mesha oo kan buuxo u dhigmo 50 saacadood usbuuc kasta.

Dalbo lacag dhimista oo waalidiinta ee barnaamijkan

Qoysaska dakhligoodu hooseeyo, waxay dalban karaan qiimo dhimis booska barnaamijka iskuulka ka dib (SFO). Markaad codsatid, waa inaad diiwaangelisaa wadarta dakhliga guud ee qoyska.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan sida loo codsado [halkan ka akhriso](#).

Xuusuusnow waqtiga kama dambaysta ah ee diiwaangelinta waa 1daa Abriil.